

BUUG TILMAAMEED AH XILI DHALAAN KA GUDUBKA

Waxyaabaha aad u baahantahay in aad ogaato inteysan ilmahaagu sadex jirsan

EARLY CHILDHOOD TRANSITION GUIDEBOOK — Somali version



PACER CENTER

KOOXDA UGU HOREYSA HALGANKA WAX U QABADKA CARUURTA LAXAADKA LA'À®

BUUG TILMAAMEED AH XILI DHALAAN KA GUDUBKA

Waxyabaha aad u baahantahay in aad ogaato inteysan ilmahaagu sadex jirsan



KOOXDA UGU HOREYSA HALGANKA WAX U OABADKA CARUURTA LAXAADKA LA'A ®

PACER Center | PACER.org
8161 Normandale Boulevard | Minneapolis, MN 55437-1044
Voice (952) 838-9000 | Toll-free in Greater MN (800) 53-PACER
Fax (952) 838-0199 | PACER@PACER.org

Paula Goldberg, Agaasimaha Guud ee PACER

©2011 PACER Center. All rights reserved. No portion of this book may be reproduced, stored in a retrieval system, or transmitted in any form or by any means, electronic, mechanical, photocopying, recording, or otherwise, without express written permission of PACER Center.

This publication was funded through a grant from the Minnesota Department of Education.

The source of the funding is from federal awards, Special Education-Part C.

Jadwalka mowduucyada buugu ka kooban yahay

Xill'i ka gudubku waxuu yahay.....	2
Gormaa iyo Sidee loo Qorsheyaa Xilli ka-gudubka.....	2
Su'aalaha wannagsan in aad weydiiso marka laga shirayo xilli-kagudubka.....	3
Sidee lagu ogadaa in ilmahaagu u qalmo.....	3
Habka Qiimeynata loo Qabto.....	3
Qorista IEP	4
Isu diyaarinta Kulanka.....	4
Qorista Yoolalka.....	4
Aqoonsiga howlaha la fulinayo iyo halka lagu qabanayo.....	5
Go'aaminta kolka howsha la qabanayo.....	5
IEP ama IIIP?	5
Doorashada Barnaamijka Dugsi horantii	5
Halka ilmaha lagu xannaaneyo.....	6
Xarunta Dhalaanka	6
Talaabaha Xiga.....	7
U diyaarinta kooxdaada, qoyskaaga, iyo ilmahaagaba isbedelka soo food leh.....	7
Waalidku waxey u baahan yihiin in ay Ogadaan	7
Waxaad qaban karto hadey ilmahaagu u qalmin howlaha waxbarashada gaar-ahaneed ee Preschoolka.....	7
Socdaalkaagu wuu sii soconaya.....	8
Kheyraad kale ee Siyaada ah.....	8
Liis-warbixin ee xill'i ka gudubka ah.....	9
Qamuus yare	10
Waqtiga go'an xill'i ka gudubka.....	11

Sanad guurada sadexaad ee ilmahaaga

waa maalin muhiim ah. Marka laga reebo dabaaldeegga, waa marka ay ilmahu ka gudbayaan waqtiga howlaha ka-hortagga ee dhalaanka ee loo yaqaan (Help Me Grow Infant and Todler Intervention Services), oo ay u gudbayaan dugsi bilowga (preschool). Waqtigan xill'i ka gudubka ah, oo ay xill'iga howlaha dhalaanka ka gudbayaan, una gudbayaan preschoolka ayaa waxaa loo yaqaan Transition. Waqtigan waxaa is bedelaya, howlaha diyaarka kuu ahaa iyo habka lagugu fulin jirey. Ahmiyad saaristu waxey ka gudbeysa, ilmahaaga dib u dhaca leh iyo qoyska, oo waxey u gudbeysa ilmaha keliya.

Buug-tilamaamedkan (guidebook) waxuu ka hadlaya, akhbaaro tilmaamaya xill'i ka gudubku waxuu yahay, goorma iyo habkee loo qorsheyaa, sida lagu garto in ilmahaagu u qalmo barnaamijka Help Me Grow iyo howlaha waxbarashada gaar-ahaneed ee ilmaha loogu fuliyo preschool, sida loo hirgeliyo qorshaha xill'i ka guurka, iyo waxaad qaban karto hadey ilmahaagu u qalmin howlaha waxbarashada gaar-ahaneed.

Waxad oganeysa baaqyo iyo xaqiqooyin kaa caawinaya in aad qorsho u hesho howl isbedelkan muhiimka ah.

Xill'i ka gudubku waxuu yahay

Gobolkan Minnesota, barnaamijka Help Me Grow ee howlaha ka-hortagga ee dhalaanka waxuu dabolaa, ilmaha dadoodu u dhaxeyso dhalaanka ill'aa 3 jir, ee u qalma qodobka Kheybta C (Part C) ee ka mid ah sharciga xaqquqaha waxbarashada gaar-ahaaneed ee dadka dib u dhaca leh (Individuals with Disability Education Act IDEA). Sharciga Part C waxu ku taqasusan yahay, sida qoyska loga caawin lahaa in ay xal u helaan baahida kobaca ilmahooda, sida fadhi barista, socod barista, ama hadal barista. Inta badanna, waxaa howlaha lagu bixiyaa jawiga ilmaha u caadiga ah, sida guriga iyo halka ilmaha lagu xanaaneyo. Howlahan iyo natijiyada uga soo baxda ilmaha iyo qoyskaba waxa lo yaqaan Qorshaha howlaha gaar-ahaneed ee qoyska (Individualized Family Service Plan IFSP).

Marka laga bilaabo da'da sadexaad il'aa ilmahu bilaabayo dugsiga xannaanada (Kindergarten), sida hoos timaadda sharciga IDEA, qeybta B, ee qodobka 619, waxa ilmaha caawiya; barnaamijka Help Me Grow, ee howlaha waxbarashada gaar-ahaaneed ee preschoolka. Barnaamijka IFSP waxa bedeli bedelaya Qorshaha Waxbarashada Gaar-ahaneed (IEP). Qorshaha IEP, ee

dugsi-horanta waxa ka mid ah; yoolal iyo hamiyado la doonayo in lagu qanciyo baahida qaaska ah ee ilmahaaga, inta ay baranayaan xirfadaha u diyaarinaya Dugsiga xannaanada.

Ilmahaagu markuu marayo xilli-ka gudubkaan, howlaha iyo caawinaduba wey is bedelayaan. Dadki xubnaha ka ahaa qorshihi IFSP ee kaa caawiyey dejinta qorshaha wey ka duwanaan karaan kuwa hadda kaa caawinaya dejinta qorshaha IEP. Intaad la shaqeyn laheyd qof howlaha isu duwe ka ah, waxaad la shaqeyneysa qof maamule ka ah xaaladda amuuraha howlaha ilmahaaga.

Gormaa iyo Sidee loo Qorsheyaa Xilli ka-gudubka

Ugu yaraan, sadex bilood ka hor inta ilmahaagu sadex jirsan, waxaa kula soo xariiraya qofka isu duwaha ka ah amuuraha ilmahaaga, si ay kulan looga xajoonaya baahida ilmahhaga iyo doorashada dugsi bilowga (preschool) looga shiro. Kulankan waxuu ka mid noqon karaa kulamada caadiga ah ee ka mid ah kuwa IFSP.

Sida munaasabka ah, adiga, qofka isku duwaha ah iyo dadka kale ee xubnaha kooxda ka mid ah, ayaa kulankan ka qeyb qaadanaya. Dad kale oo inta dheer waa la casuumi kara. Dadkan waxaa ka mid noqon kara shaqaalah waxarashada-gaar ahaneed ee ilmaha yar, qof ka socda barnaamijyada ama howlaha kale ee laga helo jaaliyadda sida (halka ilmaha lagu xanaaneyo, dugsi shaqsiyed, iyo barnaamijka head start), iyo qof kale ee walba oo u walidku doonayo in ay ka qeyb qataan sida ayeeyo/awoowo, deriska, amaba saxiib ilmahaaga si wanaagsan u gaanaya. Si wada jir ah adiga iyo kooxda waxaad ka wada hadleysan mowducyo badan, sida hadi loo baahan yahay qiimeyn lagu eegayo in ilmahu u qalmo; yoolal in ilmahu garaan la doonayo, howlo waqtii xadidan la doonayo in lagu gaaro iyo waajibaadka kala duwan ee saaran dadka xubnaha kooxda ka ah; rajadaada, riyadaada iyo waxyaabaha aad walwalka ka qabto ee ilmahaaga ku saabsan; howlaha iyo barnamijyada diyaarka ah; iyo xaqquqahaaga shrarciyed ee waxbarashada gaar-ahaneed. Iyadoo wada hadalkan kor ku xusan ay gogol xaar u tahay, waxaad dejineysan qorsho xilli-ka gudub, waxaadna isu diyaarineysan barnaamijyada isbadalaya marka ilmahaagu 3 jirsado.

Su'aalaha wannagsan in aad weydiiso marka laga shirayo xilli-kagudubka

- Waa maxay faraqa u dhexeeya kahortagga hore iyo howlaha dugsi preschoolka?
- Sidee lagu ogada in ilmaheygu u qalmo?
- Waa maxay hababka kala duwan ee howlaha loo fuliyo?
- Yaan la xiriirna hadaan doneyno in aan booqano barnaamij ama fasalka?
- Sidee dadka taqasuska ah ku caawinaa, si ay u fahmaan waxyaabaha ilmaheyga ku wanaagsan yihiin ama baahidoodu tahay?
- Gormaan kulmi donaa marka xigta?

Sidee lagu ogadaa in ilmahaagu u qalmo

Ma aha in qof walba ee hela howlaha barnaamijka Help Me Grow ee amuuraha dhexdhedaadinta dhalaanka iyo saan qaadka, helayo ama u qalmayo barnaamijka Help Me Grow ee howlaha waxbarashada gaar-ahaneed ee dugsi bilowga. Si loo ogaado in ilmahaagu u qalamo, waa in ilmahaaga mara qiimeyn.

Qiimeyntu waxey ka jawabeysa su'aalahan soo socda:

- Ilmahaagu ma leyahay dib u dhac kobaceed iyo laxaad daro?
- Waa maxay heerka kobaca ilmahaagu hadda marayo?
- Dib u dhaca kobaca ama laxaad darada haysa ilmahaaga, sameeyn ma ku yelataa in ay ka qeyb qataan ama ka faa'ideystaan xarakaadka ilmaha kale ee asagood ah qabtaan?
- Ilamahhagu ma u baahan yihiin waxbarashada gaar-ahaneed iyo howlaha laxiriira?

Si su'aalahan looga jawaabo, qiimeyn ayaa lagu eegaya garashada, dabeeccadda dhaqanka, jismiga, kobcidda, iyo cunsuurada kale ee sameeya. Qiimeyntu waxey ka kooban tahay, aruurin la isu soo aruurinayo akhbaaro badan, ee meela kala duwan laga soo tabiyey, ee ku saabsan ilmahaaga shaqeystooda iyo kobcidooda ee dhinac walba ee laga shaki qabo in ay ka jiraan dib u dhac kobceed iyo laxaad daro.

Waxaad ka ciyaareysa door muhiim ah, adigoo la wadaagaya akhbaaro caawinaad gaala, sida akhbaarada caafimaadka ama hadii ay jiraan natijyo aad ka heshay qiimeyn shaqsyeed (private evaluations). Waxaad kaloo tahay qof taqasus ku ah ilmahaaga oo garanaya waxyaabaha ilmahaagu yaqanaan. Waxaad garaneysa waxyaabaha ilmahaagu xiiseynayaan ama ay necebyihiin, ama ay jecelyihiin in ay ku ciyaraan. Akhbaaradan oo idil waxaa loo isticmaali karaa in lagu ogaado baahida waxbarasho ama kobcid ilmahaagu u baahan yihiin.

Kooxda, oo aad adiga ka mid tahay, ayaa go'aan ka gaaraya qiimeynta loo baahan yahay, si loo ogaado in ilmahu u qalmo, iyo in qorsho waxbarasho loo dejyo. Iyadoo ay ku xiran tahay dugsiga degmada aad degan tahay, waxa laga yabaa in dadki taqasuska aha ee aad horey ula shaqeyn jirtay ay qiimeynta iyo howlaha qabtaan. Ama koox cusub la abaabulo hadey ilmahaagu u qalmaan howlaha.

Inta qiimeyntu dhicin, waxaa lagu siinaya labo dokumenti. Mid waa dokumenti loo yaqaan (Prior Written Notice form) foomka Digniinta Hore ee Qoraalka ah. Tasoo ay ka mid yihiin ficolada ay degmadu kaa codsaneyso in ay ku dhaqaado, waxyaabaha la doonayo in ilmaha laga qimeeyo iyo imtixaanada la isticmalayo. Dokumentiga kale waa mid loo yaqaan (Parent Consent/Objection form) Foomka Ogolaanshaha/Diidmada Waalidka. Qiimeyntu axey bilaabaneysa marka aad saxiixdo foomkan dambe.

Haduu ilmahhagu bilaabay barnaamijka Help Me Grow ee amuuraha dhexdhedaadinta dhalaanka iyo saan qaadka, ka dib markuu 2 jirsaday, waxaa laga yabaa in kooxdu horey u sameysay qiimeynta qeybta B iyo qeybta C. Haduu ilmahaagu u qalmay howlaha qeybta B waqtigaa, dabadeed looma baahna qiimeyn kale intaan la qorin IEP. Hadii ilmahaagu u qalmin waqtigaa, kooxdu waxey dib u egeysa horumarka ilmahu gaarey, dabadeedna qadarineysa in ilmahaagu u qalmi karo. Hadey xaaladu sidaa tahay, qorsho qiimeyn ayaa la qorayaa.

Habka Qiimeynta loo Qabto

Dusiga degmada waa in uu helaa foomka ogolaanshaha, isagoo qoraal ah, oo aad ku ogolaatay in la qiimeyo ilmahaaga. Intaadan ogolaan qiimeynta, waxa wanaagsan in aad qadariso su'aalahan soo socda:

- Imtixaano iyo qalab qiimeyn nocee ah ayaa ilmaheyga loo qadarinaya, sababtuna waa maxay?

- Sidee akhbaarada loo isticmalaya in ilmaheyga loogu dejijo qorsho waxbarasho?
- Dib u dhaca ilmaheyga sameyn ma ku yelanaya natiijyada imtixaanka dhinac walba ha ahatee?
- Sidee loo qadarinaya ilmaheyga lukhadooda iyo dhaqankooda inta imtixaanku socdo?
- Maxaa cawinaad ah ee loo qabanaya ilmaheyga si ay u daremaan raaxo waqtiga imtixaanku socdo?
- Akhbaaro nocee ah ayaa la iga donaya in aan bixiy qimeynat?

Kadib markaad saxiixdo foomka ogolaanshaha, qimeynat gaar ahaneed ee ilmahaaga ayaa dad taqasus ah ku qabanayaan gurigaaga, halka ilmaha lagu xanaaneyo, dugsiga degmada, amaba goob kale. Ujeedada laga leeyahay nidaamka qimeynat waa in ay dadka ka tirsan xubnaha kooxda IEP-ga ilmahaaga, u muuqdo sawir buuxa ee ilmahaaga metalaya. Waxaa laga yabaa in lagu weydiyo su'aalo akhbaaro ah iyagoo qoraal ah ama wareysi lagula yeesho. Su'aalaha waxa laga yaba in ay yihiin kuwo ku saabsan dhalashada ilmahaaga, iyo tariiqda caafimaad, in ay gaarayeen halki kobaca laga filayey, horumarkooda, iyo jawiga guriga iyo qoyska.

Hey'adda PACER waxey kugu dhiiro gelineysa in aad su'aalo ka weydiiso heer walba oo uu nidaamku marayo. Hadii ay jiraan wax aadan ka fahmi ladahay, la hadal qofka howsha xiriiriya ka ah ama soo wac xarunta PACER.

Marka nidaamku dhamaado, waxaa laga sinayaa kobi reboor qimeynat ah, iyo fasiraad ah sababta uu ilmahaaga ugu qalmo, ama ugu qalmi waayeyhowlaha waxbarashada gaar ahaneed ee dhalaanka. Haduu ilmahaagu u qalmo howlaha, oo aad ku aqbasho in laguu fidiyo, kooxdoo waxey u kulmeysa in ay qoraan IEP.

Hadaad ku raaci weydo natiijyada qimeynat, waxaad xaq u yeelan karta in aad hesho waxa loo yaqaan an independent educational evaluation (IEE) qimeyn waxbarasho eemadax banaan, iyadoo degmada dugsigu ka masuul yahay qarashka. IEE waxaa sameeya dad taqasus ah oo aan u shaqeyn, kana madax banaan dugsiga. Waxaad la xiriiri karta hey'adda PACER hadaad u baahan tahay akhbaaro siyaado ah.

Qorista IEP

Marka ilmahu u qalmaan barnaamijka Help Me Grow ee waxbarashada gaar ahaneed iyo howlaha la xiriira ee dugsi bilowga, kooxda IEP ayaa u go'aamineysa howlaha munaasabka ah ee ilmaha loo fulinayo. Go'aankaa waxaa sal u ah natiijyada ka soo baxday qiimeyni ilmahaga lagu sameeyay. Go'aanka waxuu ku bilaabanayaa hal iyo ka badan kulano IEP, oo ay ka mid yihiin qoyska,

baraha tacliinta waxbarashada gaar ahaneed, qof ka socda maamulka dugsiga, dadka fuliya howlaha la xiriira; hadi loo baahan yahay, iyo dad kale oo qoysku ama degmada dugsigu soo casumeen.

Isu diyaarinta Kulanka

Markaad isu diyaarineyso kulanka IEP, waxa wanaagsan in aad qadariso su'aalaha soo socda:

- Horumarka ilmahaagu waa sidee?
- Maxey tacliin ahaan u bartaan?
- Maxaad rabi laheyd in ilmahaagu barto ama awood u yeshaan in ay qabtaan?
- Habkee ugu wanaagsan ee ilmahaagu wax ku baran karaa (tusale; qol ardey tiro yar dhigata, qol dhaqdhaqaaq badan oo ilmahu waxyaabo ay sahmiyaan ka helayaan, faraha ka hadal iyo calaameyn iwm)
- Howlo ama cawinaad nocee ah ayaa diyaar u ah si ay wax u bartaan?

Jawaabaha aad ka bixiso su'aalahan ayaa kooxda ka caawinaya in ay dejiyaan IEP xaqiqa ah. IEP waxaa ka mid noqonaya akhbaarada laga helay qimeynat, oo ku saabsan waxyaabaha ilmahaagu ku wanaagsan yihiin iyo waxyaabaha baahidoodu tahay. Waxaa kaloo ka mid noqonaya yoolal in la gaaro la doonayo, fasiraad ah howlaha la qabanayo, iyo halka la isla garto in ilmaha wax lagu baro.

Qorista Yoolalka

Kooxda IEP-ga, oo aad adiga waalidka ah ka mid tahay, ayaa yoolal qaas ah qoraya. Yoolalkan waxey ku saleysanyihiin, waxyaabaha ilmahaadu awood wanaagsan u leeyihiin iyo kuwa baahidoodu tahay, sida qimeynat lagu ogaaday.

Adiga xubinta ka ah kooxda IEP-ga, ayaa la wadaagaya akhbaarada ah ahmiyadaaad ilmahaaga u rajeyneyso, xarakaadka ilmahaagu qabto waqtiga xaadirka ah, iyo xarakaadka aad jeclan laheyd in ilmahaaga lagala shaqeeyo sanadka soo socda gudihiis. Yoolalku waa in ay noqdaan kuwo jadwal lagu shaqeynayo maalin walba, oo ka dhigaya ilmahaaga kuwo si madax bannaani ah wax u barta, u nool, oo jawi walba ku ciyaari kara.

Aqoonsiga howlaha la fulinayo iyo halka lagu qabanayo

Sida sharciga federaliga ah farayo, nuuca xanuunka ilmahaaga haya ma noqon karo mid howlaha sal looga dhiga. Howlaha waa in ay noqdaan kuwa shaqsiyed, ee ilmaha loo naqshadeyay. Waa in ay ku saleysnadaan qadarinta kooxda IEP-ga ee halka ilmahaagu waqtiga xaadirka ah ka marayo waxbarashada, awoodda, iyo baahidooda qaaska ah. Kooxda IEP-ga ayaa qadarineysa howlaha lagama maarmaanka ah in la qabto, yoolalka in la gaaro tahay, iyo in ilmahaagu ka faaideysto howlahaa.

Sidoo kale, nuuca xanuunka haya ilmahaaga ma aha in sal looga dhigo in ilmahu howl caawimaad helayo. Sida xaqiqadu tahay, shrciga federaaliga waxuu oranaya, ilmaha preschoolka, ah ee dib u dhaca leh, waa in wax lagu baraa jawiga ilmaha kale ee caadiga ah wax lagu baro, il'aa inta ugu badan ee munaasab noqon karta. Sharciga loo yaqaan (Least restrictive environment LRE; Jawiga ugu xaddada yar ee munaasabka ah), waxuu farayaa in ilmaha jawigaa wax lagu baro; xitaa hadii loo baahdo shaqaale siyaada ah oo tababar, agagaaraha iyo qalabka oo la bedelo, ama qalab qaas u ah ilmahaaga loo keeno, si ilmahaaga looga caawiyo waxbarashada. Ilmahaga waa in lagu meleyaa halka guriga ugu dhow ee macquul noqon karta.

Kulanka IEP-ga ayaa lagu gaaraya Go'aanada halka howsha lagu qabanayo, ka dib marka yoolalka la qoro, ee jawiga ugu xaddada yar la isla falanqeeyo.

- Yoolalka iyo hamiyadda la doonayo in la gaaro
- Howlaha la xiriira ee muhiimka ah (sida gadiidka, shaqo, daaweynta jismiga, iyo howlaha daaweynta hadalka)
- Cawinaadyo kale ee loo baahan yahay, sida waafajin iyo hab doorin (accommodations or modifications).
- Meesha/deegaanka/Jawiga ugu xadada yar ee ilmaha wax lagu baro, ee lagu gaari karo yoolalki la isla gartay.

Go'aaminta kolka howsha la qabanayo

Howlaha preschoolka la qabto waxey dhacaan sanad dugsiyeedka gudihiis. Hase ahatee, ilmaha qaarkood waxey u qalmaan in ay helaan howlahaa, waqtiga dugsigu xiran yahay, hadii loo garto in ay xirfadaa u baahan yihin, aysan lumin waqtiga dugsigu xiran yahay, amaba laga ilaalinayo xirfado aan loo bahneyn.

Go'aanka ku saabsan howlaha waqtidugsiyeedkan dheer, (extended school year services ESY) in ay munaasab yihin waxaa isla go'aaminaya adiga iyo xubnaha kale ee kooxda IEP-ga ka mid ah. Hadii sanad guurada ilmahaagu ku aadan tahay waqtiga dugsigu xiran yahay, adiga iyo kooxda IEP-ga ayaa go'aaminaya goortay howlaha bilaabanayaan.

IEP ama IIIP?

Hadey ilmahaagu howlo ka helaan dugsiga iyo hey'ad dowladeed ee aan dugsiga u shaqeyn, oo aad doneyso in labada howlood la isku duwo, waxaad codsan kartaa in la isticmaalo waxa loo yaqaan Individual Intragency Intervention Plan IIIP; Qorsho dhedhexaad gaar ahaaneed ee ka dhxeeyaa hey'adaha.

Qorshaha IIIP waxa ku wada jira howlaha dugsigu fuliyo iyo kuwa kale ee ilmahaagu u qalmo ee hey'adaha doladda. Waxa la eegaya ilmahaaga baahidooda ee jawi walaba, sida-guriga, dugsiga, iyo jaaliyadda. Waxaa kaloo laga yabaa in laqadariyo akhbaaro ama howlo kale oo ay qoysku u baahan yihin, si ilmaha looga caawiyo kobaca, iyo wax barashada. Tani waxey caawinaad u noqon kartaa, ilmaha si joogto ah ugu baahan howlo laisku duway ee jawiyo kala duwan.

*IIIP waxa la isu geynaya howlihi IEP-ga iyo howlaha hey'adaha dowladu qabtaan. Amuuraha IEP-ga, ee qasabka ah in la fuliyo, iyo kuwa ku soo siyaaday ayaa lagu xalinaya qorshaha IIIP.

Doorashada Barnaamijka Dugsi horantii

Marka la qoro IEP-ga ilmahaaga, adiga iyo kooxda diyaar waxaad u tiihin in aad radisan barnaamijo qaas u ah ilmahaaga. Ilmaha qaarkood, maalintooda waxaa

ka mid noqon kara meela kala duwan oo ay howsha ku loogu fuliyo sida:

Halka ilmaha lagu xannaaneyo

- Xarumaha ilmaha lagu xannaaneyo
- Xannaanada ilmaha ee qoyska

Xarunta Dhalaanka

- Dugsiga dadweynaha ama kan shaqsiyeed
- Karunta Head Start
- Fasalada Preschoolka oo ay bixiyaan dugsiga dadweynaha, si ilmaha d'adoodu u dhaxeyso 3 ill'aa 5 ugu qalmaan
- Dhalaanka hore ee waxbarashada qoyska (Early Childhood Family Education ECFE)
- Fasalada Dhalaanka Hore ee waxbarashada gaar-ahaneed (Early childhood special education), hadey ilmahaagu u qalmaan waxbarashada gaar-ahaneed ee preschoolka

Markaad ka fikireyso doorashadan, waxaa wanaagsan in aad ka fikirto su'aalo kale ee inta ku siyaado ah, sida:

- Waa maxay hamiyadda iyo rajada aan ilmahaeyga la jeclahay?
- Maxey ilmahaeygu waqtigan xaadirka ah u baahan yihiin si ay u koraan iyo ay u kobcaan?
- Xagee rabi lahaa in ilmahaeygu wax ku bartaan oo ay kula ciyaraan ilmaha kale ee asagooda ah?
- Akhbaaro nooce ah ayaan u baahanahay in aan la wadaago shaqaalaha cusub?

Markaad doorato halka aad ilmahaaga la jeclaan laheyd, qofka howlaha xiriirayaha ka ah ayaan balan kaaga qabanaya si aad barnaamijada u soo booqato.

Markaad booqaneyso meelaha aad qadarineyso, waxaa wanaagsan in aad su'aalahsan soo socda ka fikirto:

- Ma u egtahay in ilmahaagu ku faraxsan yihiin halka ay jogaan? Ma u egyihiin kuwa la mucaamiltamaya ilmaha kale iyo jawiga ay jogaan?
- Barnaamijka ma u muuqda mid u shaqeynaya habka ay ilmahaeyga wax ku baran?
- Xiriirka ka dhexeeyaa shaqaalaha iyo waalidka ma mid ku dhiirea gelinaya?
- Barnaamijku ma mid dhaqankeyga qadarinayaa?
- Shaqaalaha barnaamijka ma kuwa dhageysanaya talada dadka kale iyo waalidka?
- Sidee qoyku uga qeyb qataa?

- Waa maxay faraqa u dhexeeyaa tirada ilmaha iyo dadka waaweyn ee barnaamijka?
- Waqtiga loo soconayo halka barnaamijku ku yaal ma mid macquul lmaheyga iyo qoyska uh ah baa?
- Sidee ilmahaeyga ku aadaya (gadiid ahaan) barnaamijka cusub?
- Waa maxay waqtiga barnaamijka? Ma mid macquul ilmahaeyga iyo qoyska u ah baa?
- Sidee howlaha waxbarashada gaar-ahaneed loo fulinayaa?
- Sidee barnaamijkan ilmahaeyga uga caawinaya in ay diyaar u noqdaan kindergarten?

Markaad barnaamij u dooroto ilmahaaga, waxa wanaagsan in aad weydiso:

- Gormaan la kulmi karaa shaqaalaha inta ilmahaeyga loo bilaabin howlaha?
- Maxaa qalab ah oo ilmahaeygu u baahan yihiin?
- Shaqaalahu ma fahamsan yihiin in ilmahaeygu dawooyin u baahan yihiin, iyo akhbaarada dawooyinka la xiriira oo idil si ilmahaeygu cafimaadkooda iyo qatarta dawooyinka looga taxadiro?
- Sidee raashinka iyo cunnada fudud loo xalyaa?
- Sidee loo xalinayaa ilmahaeyga markuu musqusha u baahdo?
- Shaqaaluhu miyeey fahmayaan marka ilmahaeygu u baahan yihiin caawinaad qaas ah?
- Karakaad nocee ah ayaan u diyaar u ah qoyska?
- Gomaan booqan karaa xarunta oo aan kormeer heli karaa?
- Gormaan baska tijaabo ahaan u raaci karnaa hadii loo baahdo?
- Haduu ilmahaeygu aadayo barnaamij jaaliyadda ku yaal, ama xannaanada ilmaha (child care), sidee shaqaalaha fuliya waxbarashada gaar-ahaneed iyo shaqaalha halka ilmahaeyga lagu xannaaneyo ku wada xiriirayaan?
- Sidee shaqaalahu aniga igula xiriirayaa? Miyeey yeelayaan in buug qoraal ah oo aan maalinwalba ku wada xiriirno?
- Maxaa laga filayaa in ilmahaeygu bartaan sanadkaan?
- Si nabadda ilmahaeyga loo ilaaliyo, maxaa taxadir ah oo la qabanayaa?

Talaabaha Xiga

Marka codsi IEP ah la qoro, waxaa lagu siinayaan koobi aad dib u noqoto, waxaa kaloo lagu sinayaan foomka ogaanshaha/diidmada ee waalidka parent consent/objection. Hadaad raali ka aheyn oo aad ku khilaafsan tahay codsiga kooxda IEP-ga kaa codsaneyso, oo aad ku raacsaneyn halka ilmaha lagu meeleynayo, waxaad calameysa halka oraneysa "Maya", kuma raacin. Dabadeed saxiix oo ku celi foomka si loo bilaabo nidaamka lagu xaliyo khilafaadka. (hdaad dooneyso in aad akhbaaro siyaddo ah ka ogaato nidaamkan, la xiriir Hey'adda PACER Center).

Haddaad ku raacdo iyadoo qoraal ah, qorshaha ayaa la hirgelinaya. Waqtigaan waa waqtii biliow xiiso u ah ilmahaaga iyo qoyskaba.

U diyaarinta kooxdaada, qoyskaaga, iyo ilmahaagaba isbedelka soo food leh

Sida wax walba oo cusub, su'aalo badan baa soo baxaya, go'aamo badana waa loo baahanaya in la gaaro. Waa muhiim in adiga iyo xubnaha kale kooxda IEP-ga wada jir uga wada xaa jotaan arimahan, akhbaarahaa wadaagtaan, oo aad gaartaan go'aamo ilmahaaga dantoodu ku jirto. Intaad wada hadleysan, waa in aad ka fikirtaa oo aad la timadaa hab wanaagsan ee ilmahaaga ka caawinaya talaaboo yinka soo socda. Mitaal ahaan; waxaad go'aansan kartaa in ilmahaagu booqdo fasalka cusub, ama tijaabo-tababar ahaan basku racaan, ama u ogolow ilmahaaga in ay alaab ay jecelyihiin guriga kala imadaan.

Talaabta xigta waa in qoyskaaga iyo ilmahaaga loo diyaariyo macalimiinta cusb, ilmaha kale ee fasalka, jadwalka, waxyaabaha joogtada ah, xarakaadka fasalka lagu qabto, iyo waxyaabaha laga filayo. Si looga caawiyo in xilli ka gudubkan u fududaado, waxaa wanaagsan in aad isku deydo baaqyadan soo socda:

- Hore u qorshee. Waqtii badan ogolow oo go'aan lagu gaaro.
- Kala hadal qoysyada kale qibrada ay kala kulmen nidaamka.
- Baro sida loogu doodo ilmahaaga.
- Hubi warbixinada ilmahaaga caafimadkooda, waxbarashadooda iyo qiimeyn ta yihii kuwo casri ah.

Xasuuusnow in aad ilmahaaga ku darto diyaarinta. Ilmahu markey ogyihiin waxyaabaha ku soo food leh,

si kalsooni leh ayeey u xamilayaan xaaladda cusub. Waxaad qadarin kartaa talaabahan soo socda:

- Meesha cusub ee ilmahaagu u socdo, si wanaag leh uga hadal. Haduu ilmahaagu muujinayo cabsi, qiro cabsidooda, ee kala hadal.
- Hadey kuu suurowndo, sawiro ka soo qaad meesha cusub, iyo shaqaalaha cusub ee la shaqeyn doono ilmahaaga. Si aad uga caawiso, oo ay diyaar ugu noqdaan, uga shekee habka ay maalinta ugu horeysa u dheceyso
- Hadey ilmahaaga horey waqtii ula qaadan fasal ardey tiro yar leh, u diyaari qibradaa adigoo u kaxaynaya maktabadda wax lagu aqristo.
- U soo iibi shandad cusub, oo ha tusin il'aa maalinta ugu horeysa. Maalinta dugsiga ugu horeysa, uga dhig mid xiiso leh, ka qaad sawir marka ay guriga ka baxayaan.
- Hadey kuu suuro galeyso, isku dey in aad la kulanto qoysyo kale ee caruurtoodoo adaan dugsigaa.
- Ku dhiiro geli ilmahaaga in ay dadka kale la xiriiraan, oo ay caawinaad weydistaan makey u baahan yihiin.

Waalidku waxey u baahan yihiin in ay Ogadaan

Markaad ka tageyso barnaamijka Help Me Grow Infant and Todler Intervention program, waxaa lagaa codsanayaa in aad buxiso tiro koob fikrad ka qab ah. Tira koobkan ma aha mid adiga shaqsi ahaan akhbaar kaa bixinaya, Jawaabahada cidina ma ogaaneyso. Natiijyada ka soo baxda waa muhiim, sababta oo ah, waxaa loo isticmalayaa in lagu wanaajiyo barnaamijyada iyo howlaha degmada iyo tan gobolka oo idil.

Waxaad qaban karto hadey ilmahaagu u qalmin howlaha waxbarashada gaar-ahaneed ee Preschoolka

Hadey kooxdu isla garato in ilmahaagu u qalmin howlaha waxbarashada gaar-ahaneed, oo aad ku khilaafsto, waxaad codsan karta qiimeyn waxbarasho


ee madax bannaan; oo loo yaqaan Independent Education Evaluation IEE. Talabooyinkan waxa lagu qeexayaa dokumentiga la yiraahdo Educational Procedural Safeguard. Kasoo tahay in lagu siiyo marka loo fariisanayo kulanka xill'i ka gudubka (Transition planning meeting). Wuxaad kaloo kooxda weydiisan kartaa in ay kugula taliyaan barnaamijyo kale ee jaaliyadda ku yaal, oo aad ka hesho howlo ama xarakaad ilmahaaga iyo qoysku wada qaban karaan.

Hadi walwalka aad qabto ilmahaaga kobacooda weli ku hayo, waxaad ka qeyb qaadan kartaa barnaamijka baarista ilmaha yar ee degmada dugsiga aad degentahay (early childhood preschool screening) Preschool screening waa mid ilmaha oo dhan qasab ku ah inta ay bilaabin kindergarten, lakiin ilmahaaga waxaa baaristan lagu sameyn karaa waqtii kahoreysa; dàda 3 ½. Hadii la ogaado in ay xaalad jirto, ilmahaaga waxaa loo jedinayaan in ay ku labtaan waxbarashada gaar-ahaneed ee barnamijka Help Me Grow preschool si qiimeyn cusub loogu sameeyo.

Waxaa kaloo wanaagsan in isu duwaha howlaha, ee kula shaqeynaya, aad weydiiso meel kale ee kheyraad kale ka heli karto. Kuwan waxaa ka mid noqon kara barnaamijyada sida Head Start, waqtii maktabadda ilmaha xarakaad loogu qabto, iyo xarakaad kale ee jaaliyadda lagu qabto.

Socdaalku wuu sii soconayaa

Haduu ilmahaagu helo howlaha waxbarashada gaar ahaneed iyo hdeysan helinba, waxaad oganeysa marka



aad ka qeyb qaadato waxbarashada ilmahaaga inta ay korayaan, oo ay waxbaranayaan waxey ka caawineysa in ay noqdaan kuwa guul sare gaara. Waxaa jira dad badan oo taqasus ah oo ka caawini kara in aad fahamto ilmahaaga baahidooda. Dadkan waxaa ka mid ah dadka taqasuska ah ee la shaqeeya ilmaha, shaqaalah caafimaaadka, iyo kuwa kale oo howlo fuliya. Waxaa intaa sii dheer, waalidka leh ilmo dib u dhac kuwaaga oo kale ah, ama baahi qas ah leh, waa dad aad ka heli karto kheyraad aan la xadadi karin. Waxey adiga ku siin karaan akhbaaro waxtar leh iyo caawinaad, inta aad ilmahaaga ka caawineyso socdaalka waxbarasho.

Kheyraad kale ee Siyaada ah

Hagid loogu tala galay waalidka ku nool gobolka Minnesota ee qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed IEP-ga. Waa daabacaad ay sameysay hey'adda PACER Center.

Waalidka ayaa noqon kara furaha (Parents Can Be The Key, Dabacaad ay sameysay hey'adda PACER Center

Hey'adaha u qaaska ah howlaha dadka dib u dhaca leh (Disability Specific Organization. Wac hey'adda PACER Center si aad u hesho tiro kheyraad ooah hey'adaha u halgama dadka dib u dhaca leh, ama booqo bogga PACER Center, PACER.org.

Liis-warbixin ee xill'i ka gudubka ah

Liis-warbixineedkan soo socda waxuu ka cawini kara, in aad lasoscoto xarakaadka iyo horumarka aad mareyso intaad ku jirto nidaamka xill'i ka gudubka.

Ilmaha waqtigan loo fuliyo barnaamijka Help Me Grow ee dhalaanka iyo saan qaadka howlaha ka-hortagga:

- Ilmaheygu mar dhow ayeey 3 jirsanayaan, waqtigi kulanka xill'i ka gudubkana waa soo socda ama horey ayaa loo qabtay.
- Qorshaha xill'i ka gudubka ee ilmaheyga waxaa ka mid ah xarakaadka la qabanayo, waqtiyada la qabanayo, iyo magacyada dadka fulinaya qorshaha.
- Hadey ilmaheygu u qalmi wayaan howlaha preschoolka ee waxbarashada gaar-ahaneed ee barnaamijka Help Me Grow oo ay degmadu fidiso, aniga iyo qofka isu duwaha ah waan ka wada hadalnay fursado kale.
- Waa la i siiyey koobi ah Hab raaca Badbaadada (xuquuqaha sharchiyeed ee ii bannaan) Procedural safe guards. Waan ogahay hadii aan fahmi waayo, ama aan su'aalo ka qabo, in aan la xiriiri karo qofka isu duwaha ah.
- Waan ogahay in xaq u leeyahay in aan aqbali karo ama ku khilaafi karo codsiga dugsiga.
- Waxaan soo booqday xarumo suura gal ah oo aan ilmaheyga la doonayo.

Ilmaha loo qiimeeynayo barnaamijka Help me Grow ee preschoolka howlaha waxbarashada gaar-ahaneed:

- Waxan helay koobi ah codsi qorsho qiimeyn ah, waan saxiixay oo waxaan dib u diray foomka waalidka ee Ogolanshaha/diidmada waalidka.
- Qiimeyntii loo bahnaa oo idil waa la dhameeyay, natiiyyadana waan ku raacay.
- In ilmahu u qalmo howlaha waxbarashada gaar-ahaneed waa la go'aamiyey.
- Kulanki IEP-ga waa laqabtay, qorshahii IEP-gana waa la qoray. Yoolalki iyo howlaha la xiriirana (Hadii loo baahdo) waa la go'aamiyey.
- Haki ilmaheygu howsha loogu fulin lahaa waa la go'aamiyey.
- Waxan helay codsigi qorshaha IEP-ga la qoray, waan saxiixay in aan ku raacay ama ku khilaafay, waxaan dib u diray foomki Ogolaanshaha/Diidmada waalidka.
- Hadaan ku khilaaf, kulan ayaa la qabtay oo lagu xalinayo khilaafkeyga.
- Hadii loo baahdo, gadiidki ilmaha lagu daad gureyn lahaa waa la qaban qaabiyeey.
- Waxaan la kulmay oo aan la hadlay ilmaheyga macalinkooda cusub, iyo dadka howsha fulinayo. Baruhu wey ogtahay in ilmaheygu IEP leeyihiin, weyna la socotaa.

Qamuus yare

Adaptive Development

Kartida qofku isku daryeeli karo ee la xidhhiidha qubeysiga, musql galista, cunto diyaarinta, maamulka lacagta iwm.

Assistive Technology (AT) Service

Qalabka ama makiinadaha kaalmeeya ilmaha naafada ah si ay u quttaan nolol maalmoodkooda sida konbuutarka codka garta. Qalabka waxa laga heli kara meel laga soo iibsado, ama mid horey u jirey ee dhalan rogo.

Eligibility

Waa xeerar lagu qeexo ilmaha u qalanta in ay hesho adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo howlaha la xiriira.

Evaluation

Xeerarka loo isticmaalo in la ogaado in ilmahu u qalmo howlaha

Extended School Year (ESY)

Waxbarasho iyo howlaha la xiriira oo la fuliya intuu dugsigu xiran yahay

Free Appropriate Public Education (FAPE)

Waxbarashada lacag la'aanta ah ee dadweynaha: Tibaaxdan waxaa leh xeerka federaaliga ah ee waxbarashada gaarka ah. Xeerka qaranka ee waxbarashada ayaa wuxuu dhigayaa in ilmo kastaa uu xaq u leeyihiin in ay helan waxbarasho tayo leh oo lacag la'aan ah. Xeerarka dawladda fadaraaliga ah ee waxbarashada gaarka ah ayaa waxay caddeynayaan in waxbarashada dadweynuhu ay lacag la'aan tahey, ayna u haboon tahey ilmo kasta.

Individualized Education Program (IEP) Qorshaha waxbarasho ee shakhsiga ah. Barnaamij waxbarasho qoraal ah, oo loogu tala galay in lagu xaliyo baahida waxbarashada gaarka ah iyo howlaha la xiriira ee ilmaha dib u dhaca leh.

Individualized Family Service Plan

Qorshaha daryeelka qoys kasta qaas u ah. Qorsho qoran oo ka caawineysa qoyska baahida koriinka ilmahooda ama saan qaadka ah.

Individual Interagency Intervention Plan

Qorshaha ay dhawr hay'adood hal qoys ku Daryelaan. Nidaam qorsho ee loo isticmaalo marku ilmahu

degmada dugsiga ka helo waxbarashada gaar-ahaneed iyo howlaha kalena ka helo ugu yaraan hal iyo waxii ka badan ee hey'ado kale.

Least Restrictive Environment (LRE)

Meesha/deegaanka/Jawiga ugu xadada yar ee ilmaha wax lagu baro. Sharci oranaya ilmaha dib u dhaca leh wax lala bara ilmaha kale ee anan dib u dhaca laheyn inta ugu badan ee munaasab noqon karta.

Local Education Agency (LEA)

Degmada dugsiga

Mediation

Dhexdhexaad. Xeer lacag la'aan ah ee waalidka ama cidda ilmaha ka masuul ah iyo dugsiga u bannaan oo ay ku xalin karaan hadey isku khilafaan qiimeynata, goaanka u qalmidda, halka ilmaha lagu meeleynayo, ama sharciga waxbarashada lacag la'aanta ah ee dadweynaha FAPE. Labada dhanba waa in ay ka qeyb qataan dejinteeda iyo aqbalideeda go'aanka laga gaaro.

Parental Consent

Qoraal oggolaansho. Qoraalka ogolaanshaha ah ee waalidka ama cidda ilmaha ka masuulka ah in ay bixiyaan tahay inta dugsigu qiimeynata bilaabin ama howlaha waxbarashada gaar-ahaneed.

Prior Written Notice

Ogeysiinta hore ee qoraalka ah. Dokumenti qoraal ah ee dugsiga degmada shariyan tahay in uu waalidka siiyo markey codsanayaan ama diidayaan qiimeynata, dib u-qimeynata, ama doonayaan in ay ilmaha ku loo fidiyo waxbarashada gaar-ahaneed. Ogeysiinta qoraalka ah waa in 14 mal mood laga war sugaa waalidka.

Procedural Safeguards

Hab raaca badbaadada. Sida sharciga xaquuqaha dadka naafada ah farayo (IDEA), waa xaquuqo shariyeed ee ay leyihiiilmaha ilmaha dib u dhaca leh iyo qoyskooda.

Related Services

Adeegyo la xirira. Howlaha walba ee qaas ahaan loogu naqshadeyay, ee u sahleysa in ilmahu ka faa'ideysto waxbarashada gaar-ahaneed. Mitaal ahaan waxaa ka mid ah; qalabka ama makiinadaha kaalmeeya ilmaha naafada ah, gadiidka, daweynta shaqeynta/ jirka/ jimicsiga/hadalka (occupational/physical/speech therapy).

Waqtiga go'an xill'i ka gudubka



2 JIR

2 SANO, 3 BILOOD ILL'AA

2 SANO, 9 BILOOD: Kulanka looga hadlayo xill'I ka gudubka waa la qabtay, qorshaha xill'I ka gudubkana waa la qoray. (Kulanka waxaa la qaban karaa lixda bilood ee IFSP-ga dib loo egayo).

Hadey ilmahu 3 jirsadaan sprinka ama samarka (waqtiga dugsigu xiran yahay), Kooxda IEP-ga waa in ay ka wada hadlaan howlaha ESY.

Haduu ilmahu 3 jirsado samarka, kooxda IEP-ga ayaa goaan ka gaaraya goorta howlaha IEP-ga bilabanayaan.

2 SANO, 9 BILOOD: Qiimeynta qorshaha bilowga qeybta B waa la qoray, waana la siiyey waalidka si ay u qadariyaan ogolaanshaha.

Sanad guurada 3aad: IEP-ga waa la qoray, ogolaashaha waalidkana waa la helay. Howlaha qeybta C wey dhamaanayan

2 SANO, 11 BILOOD: Qiimeynti waa dhamaatay, **u qalmidina waa la go'amiyey.**

Waalidku waxa la siiyey waraqaha tira koob fikrad ka qab. Hubi inaad buuxiso ee dib u dirto.

UMA QALMIN: Loo diray kheyraadka kale ee jaaliyadda. Qeybta C, howluhu waxey ku egyihiin da'da 3 jir

3 SANO, 3 BILOOD: Dib u hubi IEP-ga ee ka wada hadla wax isbedel hagaajin ah qorshaha cusub u baahan yahay.

4 JIR





KOOXDA UGU HOREYSA HALGANKA WAX U OABADKA CARUURTA LAXAADKA LA'A ®

PACER Center | PACER.org

8161 Normandale Boulevard | Minneapolis, MN 55437-1044
Voice (952) 838-9000 | Toll-free in Greater MN (800) 53-PACER
Fax (952) 838-0199 | PACER@PACER.org